# Waa maxay micnaha guur Australia?

## Aan ku bilowno in aan samayno faham guud oo ku saabsan waxa guurku yahay

Australia gudaheeda, guurku waa isu tag la sharciyeeyay oo ka dhexeeya laba qof oo:

- ugu yaraan jira 18 sanadood
- Aanay guursanayaan qof kasta oo kale waqtigaas
- Fahamsan micnaha guurka isla markaasna si xor ah u ogolaaday inay is guursadaan.

Diinta Islaamka marka laga hadlayo, raga iyo dumarku waxay xaq u leeyihiin inay si xor ah u oggolaadaan oo ay doortaan lamaanahooda ay is guursanayaan. Waxay xaq u leeyihiin inay aqbalaan ama diidaan haddii talo guur loo soo jeediyo, xaqani waa qayb aasaasi ah oo ka mid ah heshiiska guurka ee Islaamka.

## Waxaan ka shaqaynaa xuquuqda haweenka muslimiinta ah

- Iyada oo lagu awoodgelinayo in dumarku ay aayahooda ka tashadaan
- Waxaanu keenaynaa nidaamka xuquuqul insaanka si looga hortago arrimaha cadaalad darada iyo xaqdarada ah
- Inagoo u shaqeyn doona shakhsiyaad, bulshooyinka iyo dawlada si loogu doodo isla mar ahaantaasna wax laga barto arrimaha la xiriira sinaanta ee xaaladda dalkan Australia

## Xarunta Haweenka Muslimiinta ah ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha (Australian Muslim Women's Centre for Human Rights)

**Taleefanka:** 03 9481 3000

**Iimayl:** reception@amwchr.org.au

**Boostada:** PO Box 826 Waqooyiga Melbourne VIC 3051

**Tixraaca:** intake@amwchr.org.au

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dhamaan adeegyadayada iyo shaqada u doodista booqo** www.amwchr.org.au

Australian Muslim Women's Centre for Human Rights
*Equality without Exception*

Somali | Soomaali

Australian Muslim Women's Centre for Human Rights
*Equality without Exception*

# Guurka Australia: Hage loogu talagalay haweenka Muslimka ah, dhalinyarada, iyo waalidiinta

## Guurku wuxuu noqon karaa mid diineed ama mid madani ah

Oggolaansho in la helo waa shuruud ku xiran guurka madaniga ah iyo kan diinta labadaba. Oggolaanshuhu waa hab kale oo la dhihi karo fasax-bixin. Micnaheedu wuxuu yahay in labada qof ee guurka ku midoobay ay si buuxda u fahansan yihiin in guurku dhacayo, ayna yaqaanaan cidda ay guursanayaan, isla markaasna si xor ah u ogolaadaan, ku heshiiyaan, ama u rabaan inuu guurkaas dhaco. Oggolaanshuhu waa inuu noqdaa mid dhab ah. Taasi micnaheedu waxay tahay in haddii qof lagu khasbay inuu 'heshiiskaas galo' iyadoo loo hanjabayo, cadaadis lagu saaray, been loo sheegay, la khiyaanay, ama dhibaateyn uu ku yimid guurkaas markaa tani ma aha ogolaansho.

Haddii aysan jirin wax oggolaansho guur ah, ama haddii uu qofku ka yar yahay da'da 18 sano oo qofkaasi awoodin inuu guurka oggolaado, markaa taasi waa guur qofka lagu khasbay. Guurka khasabka ahi wuxuu ka soo horjeedaa sharciga Australia.

### Oggolaanshaha guurku maaha:

- In qofka cadaadis lagu saaro inuu guursado.
- In been loo sheego, oo la isku dayo in laga caqli badiyo, ama la khiyaaneeyo qofka si loo guursado.
- In loo hanjabo, la cabsi geliyo, ama la waxyeeleeyo si markaas uu qofku 'u ogolaado' guurka.

Waxaa jira sababo badan oo ay qoysku ugu khasbi karaan qof katirsan qoyska inay guursadaan. Marar badan waxaa laga yaabaa inay si dhab ah u aaminaan in guurku u wanaagsanaan doono shaqsiga iyo qoyska oo dhanba. Mararka qaarna, guurka si toos ah ayaa loogu qasbaa qofka iyadoo la sameynayo xadgudub, hanjabaad, ama wax isdaba marin.
Wax kasta oo ay ahaataba ujeedada ka dambeysa guurka, marnaba ma wanaagsana in qof lagu qasbo guur aysan rabin.

## Ka waran guurka labada qof la isbarayo?

In waalidiinta, qoyska, ama xubnaha kale ee bulshada ka tirsan ay is baraan labada qof ee is guursanaysa, waxay noqon kartaa wax caadi u ah bulshooyinka qaar. Guurka labada qof la isbarayo, kalsoonida waxaa la siiyaa waalidiinta ama xubnaha kale ee qoyska si ay qofka ugu dooraan ama ugu soo bandhigaan lamaane, laakiin labada qof ee is guursanaysa waxay weli leeyihiin ikhtiyaar ay ku dhihi karaan 'maya' ama 'haa'. Cadaadisku maaha qayb ka mid ah guurka labada qof lais barayo oo haddii qof ka mid ah ama labada qof ee guursanaysa ay dareemaan cabsi ah in aanay maya dhihi karin, ama ay is leeyihiin ma diidi kartaan, markaas waxaa laga yaabaa inay la kulmaan cadaadis ama marxalad qasab ah oo kale.

| Guur labada qof la is baray mise guur Khasab ah? | Guurka Labada Qof La is baray | Guurka Khasabka ah |
|---|---|---|
| Labada dhinacba waxay si buuxda oo xor ah u ogolaadeen guurka | ✓ | X |
| Labada dhinacba waxay leeyihiin ikhtiyaar ay ku dhihi karaan 'maya' iyaga oo aan baqayn ama aan halis ugu jirin cawaaqib xumo ka dhalan karta diidmada | ✓ | X |
| Waa dhaqan sharci ah | ✓ | X |

Haddii ay labada dhinacba si xor ah ugu heshiiyaan guurka ay waalidkood ama qoyskoodu usoo bandhigeen, oo ay sidoo kalena leeyihiin ikhtiyaar ay xor u yihiin oo ay ku dhihi karaan 'maya', markaa taasi waa guur labada qof lais baray ee maaha guur laisku khasbay. Guurka labada qof la is baray waa guur la oggol yahay Australia gudaheeda.

In kasta oo diinta mararka qaar si khaldan loo isticmaali karo iyadoo la isku dayayo in qiil loogu raadiyo guurka khasabka ah, maaha wax ay diinta Islamka qabto. Oggolaansho ayaa loo baahan yahay si guurku xalaal u noqdo dhinaca Islaamka.

## Muxuu sharcigu ka qabaa guurka khasabka ah?

Australia gudaheeda, waxaa laga soo saaray sharciyo lagu ilaalinayo dadka khatarta ugu jira guurka qasabka ah. Waa sharci darro in qof lagu qasbo guur, ama aad qeyb ka noqoto guur qasab ah. Inaad qeyb ka noqoto guur khasab ah waxa ka mid noqon kara waxyaabo ay ka mid yihiin:

- In aad guursato qof aan raali ka ahayn guurka.
- Inaad gacan ka geysato qorsheynta ama abaabulka guurka qasabka ah (tusaale saaxiib, qoys, ama xubin bulsho).
- Inaad qofka wax mehrinaya ka noqoto guurka qasabka ah (shiikha wax mehrinaya inaad ka noqoto).

Sidoo kale waa sharci-darro in qof dalka dibada looga saaro si khasab loogu guuriyo, ama in la khiyaaneeyo ama lagu qasbo inuu dalka uga baxo si khasab loogu guuriyo.

Sharciyadani waxay khuseeyaan dhamaan guurka, haddii ay yihiin kuwo diiwaangashan oo rayid ah ama xaflado diimeed. Waxay sidoo kale khuseeyaan dhamaan dadka iyadoon loo eegayn da'da, jinsiga, dhaqanka, ama diinta.

Sharci darro maaha in qofku uu dhibbane u noqdo guurka qasabka ah, maadaama aysan dhibanayaashu marnaba eeda lahayn. Haddii lagugu khasbo guur, adigu khaladka malihid - waxaad xaq u leedahay badbaado ku noolaato, xulato cida aad doonayso, iyo in lagu taageero

## Helitaanka caawimo ama macluumaad dheeraad ah

Waxaa jira adeegyo badan oo xirfad u leh kuna siin kara caawimaad iyo macluumaad ku saabsan xuquuqda, sharciyada, iyo arrimaha socdaalka marka ay timaado guurka Australia. Shaqaalaha ka shaqeeya adeegyadan waxaa loo tababaray inay dhagaystaan ayna kaa caawiyaan baahiyahaaga.

Hoos waxaa ku yaal nambaro aad wici karto si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo taageero iyada oo wax kastaa sir kuu yihiin:

**Xarunta Haweenka Muslimka ah ee Australia ee Xuquuqda Aadanaha** - 03 9481 3000

**The Salvation Army** – 1800 000 277

**Nolol Aan Caqabado Lahayn** – 1800 403 213

**Laanqayrta Cas (Red Cross)** - 03 9345 1800